

## KHAYRAADKA LOOGU TALAGALAY SOO GALOOTIGA CUSUB EE NEW YORK

### IYADOO AAN LOO EEGIN XAALADDAADA SOCDAALKA, MAGAALADA NEW YORK WAXAY DIYAAR U TAHAY INAY KU CAAWISO.



#### Caawimaada Sharciga Socdaalka

Si aad u hesho caawimaad sharci oo bilaash ah oo ammaan ah oo ku aadan socdaalka, wac **800-354-0365**, laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha, 9AM ilaa 6PM.



#### Kaarka Aqoonsiga Magaalada New York

**Codso kaarka IDNYC**, kaarka aqoonsiga magaalada ee bilaashka ah ee dhammaan dadka degan NYC ee da'doodu tahay 10 iyo wixii ka weyn. Ku cusbooneysiiso oonleenka ama qabso ballan si aad isku diiwaangeliso, wac **311** ama booqo [nyc.gov/idnyc](http://nyc.gov/idnyc)



#### Fasallada Ingiriisiga

Qaado **casharrada luuqada Ingiriisiga** oo bilaash ah wakhti kasta, meel kasta. Booqo [wespeaknyc.cityofnewyork.us](http://wespeaknyc.cityofnewyork.us) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



#### Daryeelka Caafimaadka

**NYC Health + Hospitals (H+H)** waxay bixin karaan daryeel degdeg ah, daryeel caafimaad oo aasaasi ah, baaritaanno, tallaallo, iyo waxyaabo kale oo badan. Wac **1-844-NYC-4NYC (1-844-692-4692)** si laguugu hago xarunta kuugu dhow. Si aad isaga diiwaangeliso qorshayaasha caymiska caafimaadka, oo ay ku jiraan barnaamijka **NYC Care** wac, **646-NYC-CARE (646-692-2273)** ama booqo [nyccare.nyc](http://nyccare.nyc)



#### Caafimaadka Dhimirka

Si aad u hesho taageero qarsoodi ah iyo xiriirka aad la yeelato daryeelka caafimaadka dhimirka iyo kheyraadka isticmaalka maandooriyaha, wac **888-692-9355 ama 988**, ama fariin ugu dir eray **WELL** lambarka **65173**. Dadka reer New York waxay booqan karaan [nyc.gov/mentalhealthaccess](http://nyc.gov/mentalhealthaccess) si ay u helaan agabyo luuqado badan ku qoran oo ku aadan adeegyada caafimaadka dhimirka ee NYC, ama waxay isticmaali karaan diiwaanka oonleenka ah ee 988 ee NYC oo ah [nyc.gov/mentalhealthservices](http://nyc.gov/mentalhealthservices) si ay u helaan adeegyada caafimaadka dhimirka.



#### Gurmadka Degdegga ah

**Haddii ay xaalad degdeg ah jirto, wac 911.** Xaalad degdeg ah waa xaalad kasta oo u baahan gargaar degdeg ah oo ka yimaada booliiska, waaxda dab-damiska, ama ambalaaska. **Sida sharcigu qabo, Waaxda Booliska Magaalada New York (New York City Police Department) ma weydiin karto aqoonsiga socdaalka dhibanayaasha dambiyada, markhaatiyaasha, ama dadka kale ee caawimaad weydiista.**



#### Waxbarashada Dadweynaha

**Dhammaan carruurta NYC ee da'doodu u dhaxayso 4 ilaa 21 waxay dhigan karaan dugsiga dadweynaha.** Si aad iskaga diiwaangeliso, booqo [schools.nyc.gov/fwc](http://schools.nyc.gov/fwc) ama wac **311**.



#### Kheyraadka Guud iyo Macluumaadka Magaalada

Ma u baahan tahay inaad gasho kheyraadka magaalada ama ma dooneysaa inaad soo sheegto dhibaato? Wac **311** ama booqo bogga [portal.311.nyc.gov](http://portal.311.nyc.gov)



#### Khadka Tooska ah ee Arrimaha Muhaajiriinta ee Magaalada New York

**Wac khadka taleefanka 212-788-7654** laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha, 9AM ilaa 5PM, ama noogu soo dir iimeyl ciwaanka [askmoia@cityhall.nyc.gov](mailto:askmoia@cityhall.nyc.gov)

### AYADOO LOO EEGIN AQOONSIGAAGA SOCDAALKA, WAXAAD LEEDAHAY XUQUUQ.

#### Iska ilaali Khiyaanada Socdaalka

Haddii aad u baahan tahay talo sharci oo ku saabsan socdaalka, la hadal oo keliya qareen shati haysta ama wakiil ay Waaxda Caddaalada (Department of Justice, DOJ) aqoonsan tahay. Waxaad ka heli kartaa liiska daryeel bixiyaasha shatiga haysta iyo kuwa la aqoonsan yahay [nyc.gov/immigrationfraud](https://www.nyc.gov/immigrationfraud)

#### Xuquuqaha aad ka helayso Hay'adda Fulinta Socdaalka

Magaalada New York ma qabato fulinta sharciga socdaalka. Haddii ay ku qabtaan hay'adaha fulinta socdaalka ee federaalka, waxaad leedahay xuquuq. Booqo [nyc.gov/knowyourrights](https://www.nyc.gov/knowyourrights) ama ka wac khadka taleefanka bilaashka ah ee sharciga socdaalka **800-354-0365**

#### Xuquuqaha Shaqaalaha

Waxaad xaq u leedahay fasax xanuun oo lacag lagu helaayo, mushaharka ugu yar, mushaharka saacadaha dheeraadka ah iyo waxyaabo kaloo badan sida uu qabo sharciga Magaalada New York. Booqo [nyc.gov/workers](https://www.nyc.gov/workers) si aad u hesho taageero ama wac **212-436-0380**

#### Soo sheeg Takoorka

Tacaddiyada iyo takoorku waa sharci darro marka loo eego Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee NYC. Si aad u soo sheegto takoorka, fadlan wac **212-416-0197** ama booqo [nyc.gov/reportdiscrimination](https://www.nyc.gov/reportdiscrimination)

#### Difaaca Ka Dhanka ah Rabshadaha Qoyska

Magaalada New York waxay heegan u tahay inay ku caawiso haddii aad la kulanto xadgudub. Waxaad booqan kartaa [nyc.gov/nychope](https://www.nyc.gov/nychope) ama waci kartaa Khadka Tooska ah ee Rabshadaha Qoyska ee Magaalada New York **800-621-HOPE**

#### Xuquuqaha Kiraysteyaasha

Ma ugu baahan tahay caawimo arrimaha la xiriira ka saarista guriga ama mulkiilaha gurigaaga? Booqo [nyc.gov/tenantprotection](https://www.nyc.gov/tenantprotection) ama wac **311** ama dheh "tenant helpline" (Laynka caawimaada kireystaha) si aad u hesho caawimaad sharci oo bilaash ah

#### Xaq u lahaanshaha Hoy

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato hoy haddii aad la kulanto hoy la'aan. Ka hel adeegyada hoyga adigoo booqanaya xarunta qaabilaadda Waaxda Adeegyada Hooy La'aanta (Department of Homeless Services, DHS) ee loo qoondeeyay. Wax badan ka ogoow adigoo wacaya **311**

#### Ilaalinta Macaamiisha

Dhibaato ma ku qabtaa ganacsi? Macaamil ahaan, waxaad leedahay xuquuq. Gudbi cabasho adigoo booqanaya [nyc.gov/consumers](https://www.nyc.gov/consumers) ama wac **311**